

Soomaaliya ay horyaalaan xeerar kala duwan oo u baahan si buuxda looga wada-hadlo inta aan la ansixin si looga fo'gaado khilaafaad hor leh.

Safarkii Madaxweynaha ee Yurub.

Madaxweynaha Dawladda Puntland ayaa ka warbixiyey safarkii uu ku soo maray qaarada yurub isagoo Madaxweynuhu u kuur-gelayay xaaladda qurba-joogta Puntland, wuxuuna Madaxweynuhu ku amaanay qurba-joogta kaalintooda muuqata ee ay ka geysteen xaaladii abaarah, sidoo kale Madaxweynuhu wuxuu kula dar-daarmey qurba-joogta inay dalkooda hooyo kusoo noqdaan isla markaana maal-gashadaan.

Xiriirka Puntland iyo Galmudug

Golaha xukuumadda ayaa soo dhaweeeyay horumarka ay tiigsanayaan Mamulka Galmudug waxayna u rajeeyeen hormar wanaagsan, sidoo kale golahu waxay sheegeen inay Puntland iyo Gal-mudug si wadajir ah uga wada shaqeyn doonaan arimaha amniga iyo xalinta dhammaan khilaafaad-yada soo noq-noqda.

Warbixino:

Golaha Xukuumadda Dawladda Puntland ayaa warbixin ka dhageystay Wasaaradda Maaliyada oo howlo shaqo ka soo qabatay Gobolka Mudug iyo Wasaaradda Qorsheynta oo ka warbixisay Qorshaha horumarinta Puntland (Puntland Development forum), sidoo kale waxaa golaha maanta la horkeenay Xeerka asaaska hay'ada xiriirka Jaaliyadaha Puntland

Ugu dambeystii

Madaxweynaha Dawladda Puntland ayaa u magacaabay guddi heer wasiiro ah sidi loo xalin lahaa cabashooyinka ka soo yeeraya ganacsatada gaadiidka Puntland.

Xafiiska Afhayeenkha Madaxtooyada Dawladda Puntland

E-mail: - spk.oop@plstate.so, spofgovpl@gmail.com

Website: www.plstate.so